

Wargeyska Mountain View

Abriil 20, 2016

Qamiis, Abriil 21.....Wargelinta Dheesha Darajada 4^{aad}, 2:00 p.m.
Qamiis, Abriil 21.....Guddiga Bulsahda Dugsiga, 3:15 p.m.
Jimco, Abriil 22.....P.E. Waalidiinta, 8:30 a.m., Jikkada CLC
Talaado, Abriil 26.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:15 a.m CLC Qolka 183

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Macmacaanka waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center), maaalinta Talaadada, Abriil 26, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Dheesha Darajada Shanaad

Mountain View waxaa sharaf u ah dheesha ardayda darajada shanaad. Ardayda darajada shanaad waxay sannadka oo idil la dheeleen Dana Rossi oo ka socota Ballet West si ay uga qeybgasho jillidda "I Can Do" ee West High School. Waxaa halkaas lagu qabtay dheel. Ardayda ka socota dhowr dugsi ayaa soo bandhigay dheesha, iyo Mountain View waxaa loo mattalay si wanaagsan. Dheesha iyo farxadda ka muuqata ardayda Mountain View waxay ahayd wax qurxoon! Xubno badan oo ka tirsan dadka ka soo qeybgalay waxay la kulmeen caatifad marka ay daawadeen dheesha ardayda. Waxaan rabnaa in aan mahad u celino waalidiinta taageeray ka-qeybgalka cunugooda, macalimiinta darajada shanaad ee taageeray jillidda iyo dheesha, iyo waxaan Dana Rossi iyo Moises uga mahad celineynaa tababarka dheesha, sabarka ay yeesheen, iyo jeceelka ay u qabaan dheesha iyo ardaydena. Wanaagsan, qof kasta!

P.E. Waalidiinta

Laga bilaabo Abriil 22, dhamaan waalidiinta waxaa lagu casumay in ay ku soo biiraan Karina Gutierrez-Bowles, taasoo la xariirta fasalka lagu magacaabo P.E. Waalidiinta. Kaalay, cayaar, baro, iyo iska rid xoogaa kaloriye! P.E. Waalidiinta waxay keeni doontaa waxyaabo la mid ah iyo waxay habbeyn doontaa fasalka uu cunugaada qaato balse loo baddalay dadka qaangaaray. Kaalay oo wax ka ogow waxa caruurtaada ka sameyso P.E. isla markaasna gub xoogaa kaloriye! Tani waxaa la qaban doonaa Jimco kasta marka ay tahay 8:30 a.m. iyo waxay ku kulmi doonaan jikkada CLC. Fadlan soo qaado labbis kuu fududeeyo dhaqaaqa iyo la kaalay dhallo biyo. Isu diyaari in aad cayaartid cayaaro, gubtid xoogaa kaloriyo iyo in aad qaadatid farxad. Tani waa siyaabo wanaagsan oo loo ogaado waxa cunugaada ka barto P.E. Haddii aad qabtid su'aalo, waxaad la xariiri kartaa Karina Gutierrez-Bowles, karina.gutierrez-bowles@slcschools.org ama 801-974-8315 khadka 137

Ma jiro shaqaale ama arday loo geysan doono takoor xagga shaqada ama barnaamij ama hawl dagmada leedahay oo ku saleysan da', midab, itaal darri, ahaashada lab/dhedig, aqoonsiga lab/dhedig, macluumaadka firka, asal qaran, xaamilonimo, isir, diin, kacsiga uu qofka rabo, ama xaaladda ciidamada uu qofka ku sugan yahay. Dagmada waxay ballan qaaday in ay si siman u bixiso iyo in ay dadka siiso fursado siman xagga barnaamijyadeeda, adeegyada iyo shaqada xagga siyaasadaheeda, hababka ashtakada, helitaanka barnaamijka, isticmaalka dhismaha dagmada, fududeynta iyo arrimaha kale ee la xariira Fursadda Shaqada Siman. Dagmada waxay kaloo dhamaan kooxaha dhallinta ku qoran liiska Title 36 Sharciga Mareykanka, kana mid ah kooxaha dhallinta "scout", in ay si siman u galaan dhismooyinka dagmada. Qofka soo socda waxaa loo magacaabay in uu ka shaqeeyo su'aalaha iyo ashtakooyinka ku saabsan takoorka sharci darrada, kadeedka, iyo aar gudashada: Whitney Banks, Compliance and Investigations, 440 East 100 South, Salt Lake City, Utah 84111, (801) 578-8388. Waxaad kaloo la xariiri kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights, Denver, CO), (303) 844-5695.